



Qofkii qolo isu ekaysiia iyaguu ka mid yahay

Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabbihiye wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri "Qofkii qolo isu ekaysiia iyaguu ka mid yahay.

[Xadiis Xasan ah] [Waxaa Wariyay Abuu Daa'uud iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu sheegay in qofkii isku ekaysiia qolo gaalo ah ama faasiqiina ama saaliixiina isagoo samaynaya wax ka mida wixii lagu yaqaanay, sida caqiidada, cibaadada iyo caadooyinka iyaguu ka mid yahay, waayo oogada oo ay isaga ekaadaan waxay keenaysaa inay gudaha isaga ekaadaan, shakina malaha in hadii qolo la isu ekaysiio ay ka imaanayso inay cajabiyeen, taaso keeni karta inuu jeclaado oo wayneeyo oo uu ku dhex jiro, taaso qofka u keeni karta inuu uga ekaado xaga gudaha iyo cibaadada, Ilaahay ayaan ka magan galnaye.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5353>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

